SIDE QOFKU KAALMO U HELIKARAA?

Hadii qofka dhaqaalihiisu aanu ku filnayn wuxuu xaq u leeyahay taageero masruuf. Ugu horayn waa in qofku isku filnaan karaa dhaqaale ahaan, sida inaad raadiso shaqo, mushaharkaaga inaad qiimayso, inaad raadisid kaalmo kale (andra bidrag). Xuquuqda taageerada masruufku waa in qofku sikale dhaqaale u heli karin taaso ah in xal kale uu qofku waayay.

Hadii baanka lacagi kuu taal sida saamiga lacagta oo kale, waa inaad ugu horayn iyada isticmaashaa. Sidaa darteed waad isku filnaan kartaa.

Waxaa kaloo jira qaab kale oo lagu ilaalin karo nidaam darrada dhaqaalaha. Waxaad helaysaa gacanyare kaa caawiya su aasha aad qabto. Waxaad kale oo samayn kartaa inaad bedelato degmada aad ka tirsantahay. Hagayaasha macaamiisha iyo talo siinta arimaha qorshaha dhaqaalaha iyo daynta waxaad kala xiriiri kartaa telefonka 0250-26000.

SIDEE QOFKU U HELI KARAA GACANYARE?

Waxaad la soo xiriiri kartaa xafiiska bulshada telefoonka 0250-26400. Saacadaha 08:30-09:30 isniin illaa jimce

WAA INTEE TAGERADA MASRUFKU?

Dawladdu waxay sannad kasta go'aamisaa ugu yaraa inta masruuf ku filnaankarta qofka codsadaha ah. Heerkan waxaa loo yaqaan heer nololeedka qarameed (riksnormen). Lacagta codsaduhu uu helayo waxay ku xirantahay tirada qoyskiisa iyo caruurta da'doo.

Lacagta kaalmadu waxay dabolaysaa qarashka ku baxaya:

- Cuntada
- Dharka iyo kabaha
- Saxada ama nadaafadda
- Dhaqdhaqaaqa jirka iyo fasaxyada
- Qalabka daryelka guriga iyo dharka
- Wargeysyada maalin laha ah, telefoonka iyo Tvga

Waxaad kaloo helikartaa qarashakale oo kaalmo ah oo ku baxaya:

- Degganaanshaha
- Korontada guriga
- Caymiska guriga
- Socdaalka shaqada
- Daryeelka caafimaad iyo dawada
- Daryeelka ilkaha
- Muraayadaha indhaha
- Qasnadda shaqo la'aanta

Daryeelka ilkaha iyo muraayadaha indhaha waa inaad soo xaqiijisaa inaad u baahantahay. Kadibna qiimaha ku baxaya waxaad ku lifaaqaysaa codsigaaga masruuf ka ee aad bishaas codsanaysid.

KAALMO DHAQAALE OO KALE

Waxaad kaloo codsankartaa kaalmo dhaqaale oo kale, sida daryeelka caruurta, adeegga dadka waayeelka, alaabta guriga(möbler), maacuunta, raadiye, soo iibsiga TVga, qarashka guuritaanka, caafimaadka iyo daryeelka.

DAKHLI KASTA OO KU SOO GALAA WUXUU HOOS U DHIGAYAA KAALMADA DHAQAALE

Isku darka dakhligaaga iyo kan reerkaagu waxay yaraynayaan kaalmada. Hadii codsaduhu uu shaqaysato 1000kr waxay hoos u dhigaysaa taageerada masruufka intaas in leeg. Tusaale ahaan dakhligu waa mushaharka, gunnada waalidka, kabista kiradaguriga, hantida baankataal, saamiga, baabuurka. Guryaha xilliyada firaaqada (fritidshus) iyo wixii lamidi waxay sidoo kale hoos u dhigayaan kaalmada masruufka.

XIISO GALINTA SHAQADA

Xiiso galinta shaqadu waxay qusaysaa qofkasta oo qaatay kaalmada masruufka 6 bilood isagoo waliba shaqaynaya. Dakhliga qofka soo galay 6dii bilood 75% ayaa loo xisaa binayaa. Halka 25% uu qofku haysanayo. Sidan waxaa loo sameeyay in dadka lagu dhiiri galiyo shaqada. Kuma xirna inuu qofku 6 bilood kaqaato kaalmo degmada Mora oo kaliya. Degmo kasta oo uu qofku kaalmo kaqaatay waa loo xisaabinayaa. Arintani waxay soconaysaa 24 bilood, waa marka uu qofku buuxiyo shuruudaha laga rabo. Arintan xiiso galinta shaqadu waxay qusaysaa wixii kadambeeyay 1da juli 2013.

XASUUSNOW INAAD BUUXISO CODSIGAAGA MASRUUFKA

Waxaad buuxinaysaa faylka codsashada masruufka si dhammaystiran oo sax ah. Dir /soo qaado

- Kaarka aqoonsiga
- Faylka codsiga oo aad buuxisay
- Warqadda kiro bixinta (hyresavi) + heshiiska kirada (hyreskontrakt)
- Cadayn wixii dakhli ku soo galay iyo kaalmoba 3 dii bilood ee hore
- Koobiga kontada 3dii bilod ee hore
- Warbixinta dhaqaalaha ee baanka
- Caddayn isku darka kaalmada caruurta ee qoyska
- Tirada cashuurta aad bixisay
- Koobiga cadaynta dakhliga
- Cadayn hantida iyo daynta
- Cadayn caafimaad in xanuun kuu qoranyahay
- Rasiidka daawada iyo daaryeelka caafimadka
- Caddaynta shaqo raadinta ee xafiiska shaqada

BAARITAAN AYAA LA SAMAY NAYAA KUSAABSAN CODSIGAAGA!

Waa muhiim in codsaduhu aamin yahay taxadarna leeyahay. Tuhunka ama shakiga ku saabsan musuqmasuqu waxay sababay saa in boolisku arrintaada la wareego.

MARKAAD TIMAADO XAFIISKA ADEEGGA BULSHADA?

Markaad timaado xafiiska waxaad la kul maysaa gacanyare idinkoo wada jir u eegaya dhaqaalahaaga iyo shaqadaada. Mahelaysid go'aan degdeg ah. Gacanyaruhu wuxuu soo ururinayaa oo baarayaa warbixintaada.

TAAGEERADA MASRUUFKA ISLAMA-KIIBA LAMA HELO

Waxay qaadan kartaa 2 maalin kadib go'aanka intaadan lacagta helin. Masruufka waxaa laguugu soo dirayaa koontadaa aad ku qortay codsiga.

HUBIN

Si'loo qiimeeyo xuquuqdaada kaalmada dhaqalaha gacanyaruhu wuxu la xiriirayaa hay'ado kale sida xafiska caymiska bulshada, xafiiska shaqada iyo qasnadda shaqo la'aanta. Xiriirkan lama samynkaro ogolaanshahaaga la'aantiis.

Hadii aadan rabin in baaritaankan la sameeyo, waa in gacanyaruhu go'aan gaaraa. Taas macneheedu waa adigoo diiday codsigaaga.

XOG QARINTA AMA SIR HAYNTA

Macluumaad kaaga oo dhan waa la dhawray. Shaqaalaha adeega bulshadu way qarinayaan sirtaada. Macluumaad kaaga ma qaban karo qof aan cilmi ulahayn. Sir qarinta xittaa hay'adaha kaleba way dhawrayaan, hadii adiga aan ogolaansho lagaa helin. Hase ahaatee waxad xaq u leedahay inad iska hubiso oo aad aqrido arrintaada.

HADII AADAN KU QANACSANAYN

Hadii aadan ku qancin go'aanka lagaa gaaray, marka loo eego cutubka 4aad, waxaad dacwo qoraal ah u u gudbinaysaa 3 usbuuc gudahood xuquuqda maamulka (förvältningsrätten) oo ku taal faaluun. Xaq baad u leedahay inaad hesho warbixin iyo caawimaad ku saabsan dacwaddaada.

Maamulka dhexe ee arimaha bulshada (socialstyrelsen) ayaa ka warhaya adeegga bulshada ee degmada Mora, gobolka dhexe, Tel 075-24730 00.

HALKAN BAAD NAGA HELI KARTAA

Cinwaanka booqashada: Prostgatan 7

Cinwaanka boostada: Socialförvaltningen

Mora kommun

792 80 Mora

Telefonka xafiiska: 0250-264 00

Iimaylka: socialforvaltningen@mora.se

Websaydka: www.mora.se

MORA

WARBIXIN KU SAABSAN TAAGEERADA MASRUUFKA/LACAGTA KAALMADA BULSHADA

Xeerka maamulka adeegga bulshada cutubka 4 aad

Qofka aan awoodin inuu helo masruuf ku filan ama sikale dhaqaale u soo galo wuxuu xaq u yeelanayaa kaalmada dhaqaale ee guddiga qaabilsan arimaha bulshada(socialnämnden)oo uu ka helayo taageero masruuf (försörjningsstöd) iyo wixii kale ee uu ku noolaan lahaa. Shuruudahakan waxaa lagu caddeeyay cutubka 4 aad 1-6 §§ xeer (2001:453).

Qofkasta oo baahan waxaa loo ballan qaadayaa inuu helo heer nololeed oo macquul ah. Kaalmada dhaqaale waxaa loogu talo galay inay suurto galiso in qofku ku noolaado nolol xor ah.